

Magaca Wakaalada Adeegfulinta
Cinwaanka



* Taariikhda &Wakhtiga
Lambarka Kiiska:

Magaca Codsadaha
Cinwaanka

Tallaabada Loo Baahan Yahay
Waxaad haysataa waqtii dheeraad ah oo aad nagu siiso macluumaadka la
codsaday

MUHIIM: TALLAABO LOO BAAHAN YAHAY OO SAAMEYNAYSA U-QALMITAANKA. AKHRI
OGEYSIISKA OO DHAMMEYSTIRAN.

Waxaad na weydiisatay waqtii dheeraad ah oo aad nagu siiso macluumaadka aan u baahanahay si aan u xaqijino u-qalmitaankaaga Caawimada Caafimaadka ama MinnesotaCare. Haddaba waxaad haysataa ilaa taariikhda dhanka hoose lagu muujiyey. Haddii aad nagu siin waydo macluumaadka loo baahan yahay ugu dambeyn

taariikhda cusub ee kama dambeysta ah, laba midkood ayay noqonaysaa

- in cogsigaaga caymiska daryeelka caafimaadka iyo caawinta bixinta kharashyada la diidi doono ama
- in caymiskaaga daryeelka caafimaadka uu dhammaado.

U dir macluumaadkan ama caddeyn taariikhda ku yaalla bidixda kore ee ogeysiiskan.

Haddii aad qabto su'aalo, wac hay'adda lagu muujiyey bidixda kore ee ogeysiiskan. Haddii aanad garanayn lambarka taleefanka, ka wac Taageerada Macaamiisha Daryeelka Caafimaadka halkan 651-297-3862 or 800-657-3672 wixii caawimo ah. Ama eeg diiwaanka wakaalada ee halkan mn.gov/dhs/health-care/county-tribal-offices/.

Waa inaad na siisaa macluumaad dheeraad ah

Waxaanu macluumaad dheeraad ah uga baahanay:

Magaca: Lambarka Aqoonsiga MNsure:

Taariikhda Kama Dambeysta ah	Macluumaadka Loo Baahan Yahay	Dukumintiyada La Aqbalayo
Taariikhda	Dakhliga Sannadlaha ah ee la odorsay (PAI)	<p>Haddii aad soo gudbisay canshuur celinta federaalka 3dii sano ee la soo dhaafay, bixi nuqlu dhammeystiran oo ah soo celinta ugu dambeysay (waa inay ku jiraan dhammaan foomamka la xiriira iyo jadwalka). Haddii canshuur celinta aanay ka turjumeyn dakhligaaga sannadlaha ah ee la odorosay sabab la xiriirta isbeddel darteed, bixi caddeynya isbeddelka, oo ay ku jiraan mid ka mid ah dukumiintiyada hoos ku qoran. Haddii aanad xareyn canshuur celinta federaalka 3dii sano ee la soo dhaafay, bixi caddeyn muujineysa Dakhligaaga sannadlaha ah ee la ordorosay, oo ay ku jiraan mid ka mid ah dukumiintiyada hoos ku qoran.</p> <ul style="list-style-type: none">• Rasiidhahda mushaharka ama bayaanka dakhliga• Bayaan qoraal ah oo ka yimid shaqa-bixiyahaaga• Nuqlu jeeg ah (lacag bixinta shaqada ama adeegga)• Diiwaanada maaliyadeed ee ganacsiga• Bayaan bangi oo muujinaya lacagta• Bayaanka dulsaarka ama faa'iido qaybsiga• Waraaqda abaalmarinta• Caddaynta masruufka• Rasiidhka ama bayaanka lacag kiro ah oo aad heshay• Caddaynta iibka hantida (faa'iidooyinka raasamaalka ama khasaaraha)• Caddaynta ama diiwaangelinta dakhliga kale ee canshuurta la qaadi karo• Caddaynta dakhli hal mar ah

Ka waran haddii aan qabo su'aalo ku saabsan ogeysiiskan?

Nala soo xiriir haddii aad su'aalo qabto.

- Wixii su'aalo ah ee ku saabsan Kaalmada Caafimaadka, wac degmadaada ama wakaaladaada qabiilka.
- Wixii su'aalo ah ee ku saabsan MinnesotaCare ama su'aalaha guud ee ku saabsan Kaalmada Caafimaadka, ka wac DHS Health Care Consumer Support halkan 651-297-3862 ama 800-657-3672.

Waxaad ka heli kartaa caawimaad bilaash ah Taageere. Si aad u hesho Taageere aaggaaga jooga oo ku hadla luuqada aad doorbideyso, booqo <https://www.mnsure.org> oo guji "Assister Directory" hoosta Find Free Help (Hel Caawimo Bilaash ah).

Haddii aad qabto naafanimo maqalka ama hadalka, nala soo xiriir adigoo adeegsanaya adeeggaaga lalinta warka ee aad doorbideyso



Si aad macluumaadkan ugu hesho qaabab kale oo aad isticmaali karto ama caawimada helitaanka loo simanyahay ee adeegyada aadanaha oo dheeri ah, iimeyl noogu soo dir DHS.info@state.mn.us, wac 651-297-3862 / 800-657-3672 ama isticmaal adeega lalinta wararka ka ee aad doorbideyso. ADA (2-18)